

Xubinnimada iyo Tigidhada Matxafka oo Loogu Talagalay Qoysaska u Qalma



Minnesota
Children's
Museum



Barnaamijka *All Play* wuxuu bixiyaa qiimo dhimis xagga tikidhada iyo xubinnimada ah si loo xaqiijiyo in dhamaan qoysaska, iyadoo aan loo eegin dakhliga soo gala, ay ku ciyaari karaan madxafka.

UQALMANAANTA

Qoys kasta oo gunnooyin ka qaata EBT, WIC ama Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaranka waxay xaq u leeyihiin tikidhada ama xubinnimada qiimaha laga dhimay iyadoo loo marayo barnaamijka *All Play*.

DHAMMAAN TIGIDHADA CIYAARTA

- Qoysaska u qalma waxay iibsaa karaan tikidhada gelitaanka \$3 da'aha 1 ilaa 101
- Carruurta da'doodu ka yar tahay 1 ayaa lacag la'aan ah
- Diyaar u noqo inaad caddeynta u-qalmitaanka ku muujiso xafiiska sanduuqa.

XUBINIMADA ALL PLAY

libso xubinnimada qoyska \$39

XUBINNIMADA WAXAA KU JIRA

- Oggolaansho bilaasha hal sanno ee laba qof oo waaweyn iyo dhammaan carruurta ka yar 18 sano ee ku nool hal guri
- Hal qof oo marti ah oo dheeraad ah oo bilaash ah booqasho kasta
- 10% qiimo dhimis ah ee makhaayadda iyo dukaanka madxafka
- Qiimo -dhimisyada tafaariiqleyaasha iyo meelaha soo jiidashada leh

SIDEE BAAN XUBIN UGA NOQDAA OO U SOO BOOQDAA MADXAFKA?

- Booqo xafiiska sanduuqa matxafka si aad iskaga diiwaangeliso xubinnimada.
- Ama ka iibso xubinnimo onlayn mcm.org/join/all-play-membership/
- Diyaar u noqo inaad caddeynta u-qalmitaanka ku muujiso xafiiska sanduuqa.

LA XIRIIR MADXAFKA

- Haddii aad su'aalo qabtid, soo wac Madxafka Tel: 651-225-6000
- Booqo mcm.org si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah

Waa inoo Madxafka!

WARARKA MATXAFKA

CINWAAN

Madxafku wuxuu ku yaalaa 10 W. 7th St. Bartamaha Magaalada St. Paul.

SAACADAHA SANADKA DUGSIGA

(Maalinta Shaqada – Maalinta Xusuusta)

Isniin: XIRAN
Talaado-Jimce:.....9 a.m.-4 p.m.
Sabti:.....9 a.m.-6 p.m.
Axad:.....9 a.m.-5 p.m.

SAACADAHA XAGAAGA


Isniin-Jimce:.....9 a.m.-4 p.m.
Sabti:.....9 a.m.-6 p.m.
Axad:.....9 a.m.-5 p.m.

TIGIDHADA

Tigidhada qiimahoodu waa \$16-\$19. Waa u lacag la'aan carruurta da'doodu ka yar tahay 1. Lacag la'aan u ah xubnaha. Booqo mcm.org si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah.

GAADHI DHIG(PARKING)

Baabuurka waxaad dhigan kartaa garaashka ku yaala Wadada Wabasha ee ku dhegan Daarta World Trade Center oo aad ka soo geli kartid Wadada West 7 Street. Horey usoo qaado tigidhka oo keen Xafiiska Madxafka si aad u hesho lacag dhimis(3 saac waa \$7.50, nus saac kastana waxaa ku kordhaya \$1)



GAADIIDKA DADWEYNAHA

Madxafku wuxuu u dhow yahay wadada 10-aad oo ah halka tareenku istaago ee laga raaco. Basas badan ayaa aagaas yimaada. Si aad u ogaatid baska aad doonaysid inaad raacdo, akhri warbixinta ku qoran jadwalka Metro Transit.

XUBINNIMO

Xubinimada Reerka - \$155

- Oggolaansho bilaasha hal sanno ee laba qof oo waaweyn iyo dhammaan carruurta ka yar 18 sano ee ku nool hal guri
- 10% qiimo dhimis ah ee makhaayadda iyo dukaanka madxafka
- Dhimis ah ilaa lix tikidh martida booqashadiiba
- Qiimo -dhimisyada tafaariiqleyaasha iyo meelaha soo jiidashada leh
- 50% qiima dhimis ah madxafyada carruurta badan ee ku yaal Mareykanka

Dheefaha Dheeriga ah ee Xubinimada Reerka - \$255

Dhammaan dheefaha xubinimada Reerka, ku dar...

- 6 kaar oo baarkin bilaash ah, 4 tikidh oo oggolaanshaha gelitaanka oo lacag la'aan ah, 4 foojaro oo kuwa jalaatada ah
- Madxaf gaar ah shay calaamadeysan
- Oggolaanshaha gelitaanka oo bilaash ah ama qiimo jaban oo lagu galo matxafyo badan oo ku yaala Mareykanka oo dhan

Ku dar marti - \$30 midkii

- Gelitaan bilaash ah saaxiib, daryeel-bixiye, ayeeyo ama qaraabo kale booqasho kasta
- Wuxuu noqon karaa marti kala duwan booqasho kasta

WARBIXINTA MATXAFKA

- Madxafku wuxuu ka kooban yahay 3 dabaq oo bandhig ah. Carruurta jirta 1 sano ilaa 10 jir aad bay uga helaan Madxafka.
- Madxafku wuxuu carruurta 3 sano jirta iyo kuwa ka yarba ugu tala galay bandhig khaas ah oo iyaga khuseeya.
- Dukaan cuntada iyo cabitaanka lagu gado ayaa Matxafka ku yaala.
- Dabaq walba wuxuu leeyahay musqulo iyo qolal nuunaha lagu nuujiyo.
- Waad lasoo geli kartaa Matxafka nuune xambaarka(stroller).
- Dhammaan carruurta soo booqanaysa matxafka waa inay la socdaan oo ay kormeeraan dad waaweyn oo 18 sano jir ah ama ka weyn mar kasta.
- Sanduuqyada kaydinta alaabada ayaa laga heli karaa meel u dhow sanduuqa xafiiska. Sanduuqyadu waxay u baahan yihiin afar meelood meel isticmaalka mar keliya.

AWOODDA CIYAARTA

Bandhigyadeena waxay kobciyaan waxbarashada caruurta iyadoo loo marayo ciyaaro. Cayaartu waxay dhistaa maskaxda iyo jirka. Marka carruurta ciyaaraan, waxay kobciyaan xirfadaha ay ugu baahan yihiin inay ugu guul gaaraan guriga, dugsiga iyo meel kasta oo kale.